miljöpartiet de gröna

# AYDHIYOOLAJIYADA CAGAARAN – KU MIDOWGA FICILKA

Soo koobid gaaban oo ah barnaamijka Xisbiga Cagaaran ee Iswidhishka.

**Waraaqdani waa soo koobid gaaban oo ka warramaya barnaamijka xisbi ee xisbiga Cagaaran ee Iswidhishka. Markii barnaamijka xisbiga la qoray, kumanaan qof ayaa ka dhiibtay ra'yi, soo-jeedin siyaasad, ereyo iyo dood siyaasad guud ah. Taas, haddi kaligeed la eegaba, ayaa ah mid ka mid ah dhidibyada aydhiyoolajiyada cagaaran. Siyaasadda – iyo bulshada –ayaa ah wax aan isku geyno. Taasi waa codkeena cagaaran ee noo dhexeeya.**

**Waxaad ka akhrisan kartaa barnaamijka xisbiga dhammaantiis barta internedka www.mp.se/partiprogram**

Xisbiga Cagaaran ee Iswidhishku waa qayb ka mid ah dhaqdhaqaaq caalami ah oo ku dadaalaya sidii loo heli lahaa adduunyo dhammaan aadanuhu nolol wacan ay ku noolaadaan, iyaga oo aan wiiqin xaaladaha nolosha loogu talagalay jiilasha soo socda. Siyaasaddayadu waxay salka ku haysaa aragti dhammaystiran: wax kastaa wey isku xidhan yihiin.

Bani-aadanka ayaa caqabado badani ku beegan yihiin. Siyaasadduna waa muftaaxa isbeddelka, oo waa in waliba la tilmaamaa jidka lagu tagayo bulsho waari karta. Cagaaranyaashu waxay ka mideysan yihiin hawsha wada-jirka ah ee dib loogu qaabaynayo bulshada looguna talagalay jiilka cusub.

Xisbiga Cagaaran ee Iswidhishku waa xisbi la jira haweenka. Kala duwanaanta, sinnaanta iyo jinsi sinnaanta ayaa aasaas u ah bulshada cadaaladda leh. Waxaan aamminsannahay in kala duwanaanta dadku hodan u tahay adduunka.

**Siyaasaddayadu waxay salka ku haysaa saddex arrimood wadajir leh:**

- la mideysnaanta nidaamka xayawaanka, dabiiciga iyo deegaanka;
- la mideysnaanta jiilalka soo socda;
- la mideysnaanta dadka aduunka oo idil.

**Bani-aadanka**

Bani-aadanka ayaa ah duul hal-abuur iyo beer-jileec leh, oo karti iyo oggolaan u leh inay xilka qaadaan. Afkaarta bani-aadanka ayaa ka kooban kala duwanaan la yaab leh oo hagta kobaca horumarka leh. Waxaan kalsoon nahay dimuqraadiyadda, oo ay u weheliso muwaadiniin firfircoon oo arrimaha ka qaybqaata. Taasii waxay u baahan tahay in macluumaadka si fudud loo helo, doodda siyaasadeedna si fiican loo qabto oo la helo fursado ay muwaadiniintu ay ku soo bandhigaan talooyinkooda ay u jeedinayaan golayaasha siyaasadeed.

Aragtida dhaqdhaqaaqa cagaaran ee ku wajahan siyaasadda ayaa ah mid xorriyadeed.  Afkaaraha cusub ayaa ku magoola meelaha ay dadku  xorta u yihiin inay u fikiraan oo ay wax u aamminaan sida ay jecel yihiin, iyo meesha fikradaha, aragtida iyo kala duwanaanshaha la ixtiraamo. Qof kastaa waa inay yeelato xuquuq iyo fursado isku mid ah – iyada oo aan loo eegin jinsi, isir, diin, naafanimo, nooca galmada, isku aqoonsiga jinsiga, muujinta jinsi ama da'da.

Carruurtu  ayaa ka mid ah qaabaynta bulshada, oo ma aha uun kuwo iska qaata kaliya bilaa firfircoonaan bulshada ay dadka waawayni u abuuraan iyaga. Siyaasadda bey'adda ayaa u baahan aragti dheer; iyada oo maalgashiga carruurta waliba uu yahay maalgashi mustaqbalka ah.

Dugsiyaduna waa inay ilmo kasta siiyaan fursad ay ku kobcaan. Ardaydu waa in aanay guul iyo guul la'aan noqon, sidoo kale ayna jirin dugsiyo wanaagsan iyo dugsiyo xun. Siyaasaddu waa inay siisaa shuruudo u gaar ah dugsiyada oo wax-ogaanshaha aan laga dhargin ee ardayda iyo xeel-dheerida macallimiinta loo isticmaalo si buuxda. Waxaan kalsooni ku qabnaa waxbarashada dadka waawayn iyo waxbarashada nolosha-dheer ah. Markuu qof kastaa helo  fursad u ku doorto habka noloshooda, waxaan wada dhisi karaan bulsho adag.

Qof walba waa in la siiyaa fursad isku mid ah oo ay ku hantaan himilooyinkooda. Takooridda dhammaanteed waa in laga hortago oo qofna waa inaan loo muujin cunsurinimo ama dambiyada nacaybka.

**Bey'ada**

Aydhiyoolajiyadda cagaarani ma aha kaliya uun xidhiidhka u dhexeeya bani-aadamka, laakiin waliba waa arrimaha ku saabsan ku tiirsanaanteena wax kasta oo hareeraheena jira. Xilka saaran bani-aadamku wuxuu dhaafsan yahay qofka iskii ahaan iyo xitaa jiilkiisaba. Xayawaanka ayaa xaq u leh inay u dhaqmaan dabiici ahaan, oo ma aha in la silciyo.

Qaabka ay u nololyihiin inta ugu tijaarsan adduunka ayaa mahadho ku leh xitaa inta ka baxsan soohdimaha dalalkaas. Waa inaan beddelno bulshooyinkeena si aan u heli karno nolol wanaagsan mustaqbalka oo aynaan burburin isla mar qudha fursadaheena, iyo dadkyowga kale ee ku nool dalalka kale iyo jiilalka soo socda.

Isbeddelka cimilada ayaa khatar galineysa mustaqbalkeena. Waxay saamayn ku leedahay nolosha dadka shaqsi ahaantiis, iyo dhaqaalaha caalamka iyo badbaadada quruumo dhan. In kasta oo aan aqoon u leenahay arrimahan oo dhan, haddana qaac siideynta gaasyada guri-cagaarka ayaa sii kordhaya. Waxaan horseedayaal u noqon doonaa yaraynta saamaynta aadanahu cimilada ku leeyahay. Iswidhin ayaa si taariiqiyan ah sababtay, oo weli sababta heerar qaac bixid aad uga sarreeya heerarka adduunka lagu waari karo. Iswidhin ayay horyaalliin shuruudo gaar ah oo lagu hogaaminayo kala guurka lagu noqonayo bulsho waarta, iyo inay muujiyaan fursadaha loogu talagalay nooc horumar kuwii hore ka duwan. Taasi waxay u baahan tahay siyaasad bey'adeed oo geesino leh. Haddaan nahay Xisbiga Cagaaran ee Iswidhin waxa naga dhaadhacsan in bulshada u fiican cimiladu tahay bulsho dadka u fiican.

**Dhaqaalaha**

Adduunka ayaa u baahan siyaasad dhaqaale oo cusub. Marka loo eego habkii loo bartay kobac dhaqaale joogto ah ayaan suurtagal ka ahayn duni leh kheyraad kooban. Waxa jira dhowr mabaadii ah oo iska cad:

- Waxa u wanaagsan dadka iyo deegaankaba waa inay ahaadaan wax riqiis ah.
- Waa u xun dadka iyo deegaankaba waa inay ahaadaan qaali.
- Waxyaabaha burburinta leh waa in la manuucaa.

Sanaacinimada aadanaha ayaa suurtagalisay kobac dhaqaale degdeg ah qarniyadii dhawaanta ahaa. Horumarkaas ayaa  u ahaa wanaag siyaabo badan, laakiin isla markaas isticmaalka  khayraadka iyo qaac ku siidaynta gaasyada guriga-cagaaran ee cimilada ayaa sii koradhay. Kala duwanaanta uunta dhirta iyo san-ku-neeflaba leh ayaa yaraatay Markaan ku kacno arrimo kala hooraysiin cusub iyo tallaabooyin cusub oo ku wajahan samafalka, waxaanu u dhisi karnaa dhaqaale aan ku tiirsanayn koritaan joogto ah.

Waxaan aamminsanahay bulsho waari kartaa inay u baahan geesinimo go'aammmo siyaasadeed lagu gaadhi karo. Sidaasi waxay dhici kartaa waliba marka qiyamka go'aammada aan lagu qorshayn kaliya isticimaalka hab koritaanka maanta caadada loo leeyahay.

Helitaan tamar jaban oo qaab dhuxul dhagaxeed iyo saliid ah ayaa sababay qaac siidayn gaasyo guri-cagaar badan leh. U beddelidda dhaqaalaha  muddada-dheer ee waari karta ayaa ah inta ugu badan beddelida nidaamka tamarta. Waa in aan isticmaalnaa tamarta waxtarkeedu ka badan tahay oo  qiyaasta tamarta la cusboonaysiin karaana noqo 100 kiiba boqol.

Waxaan rabnaa in aragno bulsho xor ka ah quwadda nukliyerka. Quwadda nukliyerka ayaa wadata halis aad u weyn, oo u keeni doonta qashin shucaac jiilalka soo socda.

Haddii aynaan wax ka beddelin habka tamarta hadda, markaan hoos joogno xaalado habsami leh, kheyraad la'aanta ayaa inagu qasbi doonta isbeddelka goor dambe. Laakiin wuxuu markaas noqon doonaa wax kharash aad u badan u leh qofka muwaadinka ah, shirkadaha iyo quruumaha dhammaantood.

**Samafalka**

Samafalka ayaa siin doona dadka xorriyad, tayo nolol iyo xasilloonaan. Waxaan ugu xoog badan nahay markaan ognahay inaan isku daryeeli karo midba midka kale markaan ugu jilicsan nahay. Sidaa darteed bulshadu waa inay ufidisaa daryeel iyo fiiro gaar ah markaan u baahannahay. Bulshadu  waa inay waliba hubisaa inay u jirto nidaam haqab-beel dadka buka iyo kuwa shaqo la'aanta ah. Waa macquul inay kuwa ladani ugu deeqaan in ka badan dadka kale ujeeddooyinka dadka ka dhexeeya.

Daryeel-caafimaadka Iswidhin ayaa ku saleysnaan doona sinnaan iyo casrinimo. Si loo dhiirrigaliyo caafimaadka wanaagsan, waa muhiim in la maalgaliyo daryeelka caafimaadka dadweynaha.

Waxaan rabnaa inaan gobollada iyo degmooyinka siinno awood ka sii badan go'aammada siyaasadeed ee saamaynta iyaga ku leh. Iyada oo aan loo eegin dalka meesha aad kaga nooshahay, waa inaad marin ugu heshaa adeegyada bulshada ee muhiimka ah, sida booliiska, xafiisyada boostada iyo telefoonada goobta ku rikiban. Iswidhin waa inay kabtaa "barnaamij milyanka" guriyeynta. Waa inay jiraan meelo Iswidhin ka tirsan oo deggeneyaasheedu dareemi karaan inay u guuri karaan si ay u helaan fursad wanaagsan.

Aragtidayada ayaa ah in dhammaan kuwa dakhli aan lahayn dammaanad looga qaado taageero suurtagalinaysa in lagu noolaan karo, iyada oo aan loo eegin dakhligii ay horay u heli jireen, iyo iyada oo aan loo eegin sababta ay dakhli la'aanta u yihiin. Waxaan rabnaa inaan aragno qorshe caymis wadajir ah, oo ay maamusho hal awoodi. Waxaan inta badan ku doodnaa waa inuu jiraa ”albaab kaliya oo laga soo galo”, si looga fogaado in shaqsiyaadku ay meel dhexaad ugu dhacaan.

Hawlaha samafalka waa inaan loola dhaqmin si kasta oo la mid ah meel wax lagu gala iibsado. Uma nihin macaamil samafalka, waxaan nahay muwaaddin. Lacagaha cashuurta waa in loo isticmaalaa hawlihii loogu talagalay, oo ahayn in loo bixiyo macaash ahaan.

**Adduunka**

Dadyow badan oo adduunka ka tirsan ayaa ku jira habsocodkii ka bixitaanka saboolnimada. Barwaaqada ayaa fideysa, isku-celcelinta dhererka cimiriguna wuu kordhayaa, dhimashada ubadkuna hoos ayay u dhacaysaa. Isla mar ahaantaana, bani aadanka waxa ku soo wajahan caqabado cusub oo leh qaab kheyraadka dabiiciga ah oo ka faa'iideysigoodu xadka dhaafay iyo halisyo bey'adeed. Hawsha dhaqdhaqaaqa Cagaaran ayaa in la helo habab dad ka sii badan intii hore ay uga qayb noqondaan barwaaqada, isla markaas iyada oo ay ina haystaan dhibaatooyin cimilo iyo bey'adeed.

Xisbiga cagaaran ee Iswidhishka ayaa si aad u jecel iskaashi caalami ah. Isla markaana, waxaan rabnaa in fursad awoodeed la siiyo kuwa ay arrimuhu saameeyaan. Fikraddaas micnaheedu waa annaga oo shaki ka qabna awoodaha iyo go'aammada oo ku urura dowladda dhexe taas oo ka fogeyneysa awoodda dadka.

Xisbiga Cagaaran ee Iswidhishka ayaa ka soo horjeedda Midowga Yurub. Waxaan rabnaa in ay Midowga Yurub noqoto iskaashi dabacsanaan ka badan leh, halkaas oo dalka kasta gaar ahaan u dooran karo, illaa heer macquul ah, qaybaha ay rabaan inay ka qayb qaataan. Iswidhin ayaa rabta inay dibadda ka sii ahaato EMU (Ururka Dhaqaalaha iyo Lacagaha Yurub).

U kala-dhexgal nabadeed iyo gargaar ayaan suurtagal ahayn isla marka aan u dhoofino hub dalalka diktaatooriyadda iyo saboolka ah. Horumar caalami ah oo cadaalad iyo waaritaan leh ayaa ah in laga hormariyo danaha dhaqaale ee muddada-gaaban.

Xisbiga cagaaran ee Iswidishka ayaa leh aragti dheer oo ah adduunyo aan xuduud lahayn, halkaas oo ay dadka oo idil socdaali karaan, laakiin qofna aan lagu qasbin inay barkacaan. Ma aamminsanin xaqa ay dalalku u leeyihiin doorashada ay dooranayaan dadka ku dhex noolaanaya, waxaan amminsannahay xaqa lagu dooran karo qofka

kastaa inuu ku noolaado meesha u rabo. Dadka waa inay fursado hor yalliin, ee ma aha derbiyo inay ka hor yimaddiin. Waxa sharaf noo ah annaga oo ah xisbiga ugu gacmo furan soo dhawaynta soo-haajirayaasha.

**Sahamiyeyaasha**

In kasta oo Xisbiga Cagaaran ee Iswidhishku yahay xisbi siyaasadeed, waliba haddana waxaan nahay sahamiyeyaal. Wakhtiga waan ka horraynaa isla markaana wan ku dhex jirnaa. Waa in annaan lumin xidhiidhka aan leenahay kuwa inaga dambayn doona, laakiin isla markaana ma aha inuu wakhti inaga lumo. Waxaan ku calool-adaygaynaa inaan tallaabada horay u qaadno

Dadka naxariista iyo go'aanka leh ayaa beddeli kara aduunka. Horumar kasta ayaa ku bilaabmata wax aamminka iyo wax u heellaanaanta shaqsiga.  Kaalin wax ku ool leh yeelo!

Waraaqdani waa soo-koob gaaban oo ka warramaya barnaamijka xisbi ee loogu talagalay xisbiga Cagaaran ee Iswidhishka. Halkan waxaad ka akhrisan kartaa arrimaha ku saabsan aragtida iyo aydhiyoolajiyadda ay salka ku hayaan  arriimaha siyaasadeed ee soo-jeedintayda ah. Haddii aad daneyso oo aad rabto inaad wax dheeraad ah aad ka ogaato siyaasaddayada, waxaad ka akhrisan kartaa  internetka www.mp.se. Halkaa waxaad ka heli doontaa barnaamijka xisbiga oo dhammaystiran.